# WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WARSIDAHA BISHA

## JUUN 2026



## HORUDHAC

Warsidaha Bisha **Juun 2026** ee Wasaaradda Amniga Gudaha XFS wuxuu muujinayaa dadaallada Wasaaradda ee ku aaddan xoojinta amniga qaranka, dib-u-habeynta hay'adaha amniga, tayeynta ciidamada iyo shaqaalaha, iyo kobcinta wada-shaqeynta dowladda Federaalka, dowlad-goboleedyada iyo saaxiibbada caalamiga ah.

Inta lagu guda jiray bishan, Wasaaraddu waxay mudnaan siisay isku-duwidda howlaha amniga, la-tacaalidda khataraha miinooyinka iyo walxaha qarxa, horumarinta tababarrada iyo taageerada farsamo, iyo hirgelinta qorshayaal lagu xaqiijinayo amni waara, xasillooni qaran iyo adeeg amni oo hufan.



## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha - XFS oo Furay Shir ku Saabsan Arrimaha Miinooyinka iyo Walxaha Qarxa

**Muqdisho - Soomaaliya 24 Juun-2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudahaee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Shire, ayaa si rasmi ah u furay Shir lagu xoojinayo isku-duwidda iyo wada-shaqeynta dadaallada ka hortagga iyo maareynta miinooyinka iyo walxaha qarxa ee Soomaaliya.

Shirkan oo ay soo qabanqaabisay Hay'addaMaareynta Walxaha Qarxa ee Soomaaliya (SEMA), isla markaana ay taageertay Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Miinooyinka (UNMAS), ayaa waxaa ka qaybgalay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Amniga Dowlad-goboleedyada, madaxda SEMA ee heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed, wakiillo ka socday Qaramada Midoobay, hay'adaha caalamiga ah, ururrada qaran iyo bah-wadaagta ka shaqeeya arrimaha miinooyinka.

Intiiuu furayay shirka,Agaasimaha Guud ayaa carrabka ku adkeeyay in miinooyinka iyo walxaha qarxa ay weli caqabad weyn ku yihiin amniga, xasilloonida, dib-u-soo kabashada iyo horumarka dalka. Waxa uu xusay in loo baahan yahay iskaashi qaran oo xooggan iyo isku-duwid wax ku ool ah si loo yareeyo khataraha ay walxaha qarxa ku hayaan shacabka Soomaaliyeed.

Shirka ayaa diiradda lagu saaray qiimeynta xaaladda guud ee miinooyinka iyo walxaha qarxa ee dalka, mudnaanta iyo caqabadaha horyaalla dadaallada ka hortagga iyo maareynta miinooyinka, xoojinta wada-shaqeynta u dhexeysa Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada iyo bah-wadaagta caalamiga ah, iyo sidiiloo mideyn lahaadadaallada lagu yaraynayo saameynta walxaha qarxaku yeelanayaan bulshadaSoomaaliyeed.

Sidookale, ka qaybgalayaasha ayaa ka wada hadlay muhiimadda ay leedahay Hindise-sharciyeedka SEMA ee lagu xoojinayo qaab-dhismeedka qaran ee arrimaha miinooyinka, horumarinta wadaagga xogta,mideynta fariimaha istiraatiijiga ah, iyo kor u qaadistataageerada iyo dhaqaalaha loo baahan yahay si loo hirgeliyomudnaanta qaran ee la xiriirtaarrimaha miinooyinka.

Kulanka ayaa sidoo kale fursad u noqday hay'adaha dowladda iyo bah-wadaagta inay soo bandhigaan xaaladda iyo horumarka howlaha ay ka wadaan dalka, isla markaana ay ka wada hadlaan fursadaha lagu xoojin karo iskaashiga, isku-duwidda iyo hababka wadajirka ah ee lagu gaari karo Soomaaliya oo ka xorowda khataraha miinooyinka iyo walxaha qarxa.

Shirkan Heer-Qaran ayaa la filayaa inuu xoojiyo wada-shaqeynta iyo isku-duwidda hay'adaha ay khusayso, kor u qaado taageerada loo fidinayo arrimaha miinooyinka, isla markaana gacanka geysto dhismahabulshooyin ammaan ah oo ka madax bannaankhataraha walxaha qarxa.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha oo Guddoomiyay Kulanka Toddobaadlaha ee Agaasimeyaasha Waaxyaha



**Muqdisho - Soomaaliya 23-Juun-2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa guddoomiyay kulanka toddobaadlaha ah ee Agaasimeyaasha Waaxyaha Wasaaradda, kaas oo lagu falanqeeyay horumarka howlaha socda, xaaladda amniga guud, dib-u-casriyeynta Wasaaradda, iyo qorshayaasha mudnaanta leh ee la fulinayo muddadasoo socota.

Kulanka ayaa sidoo kale lagu dhageystay warbixino ku saabsan howlaha waaxyaha kala duwan iyo tallaabooyinka lagu xoojinayo amniga xarunta Wasaaradda.

Agaasimaha Guud ayaa ku boorriyay Agaasimeyaasha inay sii xoojiyaan wada-shaqeynta, isla-xisaabtanka iyo dardargelinta howlaha mudnaanta u leh Wasaaradda si loo xaqiijiyo amni waara iyo adeeg hufan.



## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha – XFSoo si rasmi ah u furay aqoon-is-weydaarsi socon doona seddex maalin

**Muqdisho - Soomaaliya 23-Juun-2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudahaee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Shire, ayaa si rasmi ah u furay aqoon-is-weydaarsi socon doona saddex maalmood oo lagu xoojinayo wada-shaqeynta warbaahinta iyo hay'adahaamniga.

Aqoon-isweydaarsiga ayaa waxaa ka qaybgalaya masuuliyiin ka socota hay'adaha amniga, saxafiyiin, tifaftirayaal, afhayeenno iyo saraakiisha isgaarsiinta ee hay'adaha dowladda, kuwaas oo ka wada hadlaya sidii loo dhisi lahaa kalsoonida shacabka, loo xoojin lahaa isgaarsiinta amniga, loogana hortagi lahaa wararka been-abuurka ah iyo marin-habaabinta bulshada.

Khudbaddiisa furitaanka, Agaasimaha Guud ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay iskaashi dhow oo u dhexeeya warbaahinta iyo hay'adaha amnigasi loo xaqiijiyo gudbinta macluumaad sax ah, kornaloogu qaado wacyiga bulshada iyo amniga qaranka.

Inta uu socdo aqoon-is-weydaarsigu, ka qaybgalayaashu waxay falanqeyn doonaan mowduucyoay ka mid yihiin anshaxawarbaahinta, hubinta saxnaanta xogta (fact-checking), maaraynta isgaarsiinta xilliyada qalalaasaha (crisis communication), iyo hababka lagu xoojin karo wada-shaqeynta warbaahinta iyo hay'adaha amniga.

## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha – XFS oo soo xiray shirka Wadatashiga Amniga ee DowladdaFederaalka Soomaaliya iyo Dowlad-goboleedyada



**Muqdisho - Soomaaliya 22-Juun-2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane MaxamedShire, ayaa soo xiray Shirka Wadatashiga Amniga ee DowladdaFederaalka Soomaaliya iyo Dowlad-goboleedyada, oo laba maalmoodka socday Muqdisho.

Shirka ayaa diiradda lagu saaray xoojintaisku-duwidda iyo wada-shaqeynta hay'adaha amniga, hirgelinta Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka,iyo sare u qaadidda amniga iyo xasilloonida dalka.

Intii uu socday shirka, Wasiirrada Amniga Dowlad-goboleedyada, madaxda hay'adaha amniga iyo saraakiil sare ayaa si wadajir ah uga dooday mudnaanta amniga qaranka iyo sidii loo mideyn lahaa dadaallada lagu sugayo amniga.

Shirka ayaa lagu soo gabagabeeyay war-saxaafadeed iyo go'aanno lagu xoojinayo wada-shaqeynta hay'adaha amniga iyo dardargelinta dadaallada lagu xaqiijinayo amni iyo xasillooni waarta.

## Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada oo Muqdisho uga shiraya xoojinta isku-duwidda Amniga




**Muqdisho - Soomaaliya 21-Juun-2026:** Wasaaradda AmnigaGudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdishoka daahfurtay Shirka Wadatashiga Amniga ee labada heer ee dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada dalka.
Shirkan oo ah mid muhiim ah ayaa diiradda saarayaa xoojinta iskaashiga, isku-duwidda iyo wada-shaqeynta hay'adaha amniga, si loo mideeyo dadaallada lagu sugayo amniga dalka.

Waxaaka qeybgalaya Wasiirrada Amniga dowlad-goboleedyada, madaxdahay'adaha amniga heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, iyo saraakiil sare oo ka tirsan laamaha amniga dalka. Shirku wuxuu diiradda saarayaa xaaladda amniga guud ee Soomaaliya, horumarinta qaab-dhismeedka amniga qaranka,iyo dejinta qorshayaal mideysan oo wax looga qabanayocaqabadaha amni ee jira.

Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), oo furay shirka,ayaa sheegay in wada-shaqeynta dhow ee dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyadu ay tahay tiir muhiim u ah sugidda amniga iyo xaqiijinta xasillooni waarta oo dalka laga hirgeliyo.

Sidookale, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, MudaneMaxamed Shire, ayaa sheegay in shirka uu yahay madalistiraatiiji ah oo lagu mideynayo aragtiyada iyo dadaallada amniga dalka, si loo helo hannaan amni oo mideysanoo wax ka qaban kara baahiyaha jira.

Inta uu shirku socdo, waxaa lagu falanqeeyay arrimo ay ka mid yihiin xaaladda amniga dalka, hirgelinta qaab-dhismeedka amniga qaranka, horumarinta nidaamka booliiskacusub, maamulka xuduudaha, iyo xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha amniga ee heerarka kala duwan.

Ugu dambeyn, shirka ayaa laga soo saaray talooyin iyo go'aanno wax-ku-ool ah oo lagu xoojinayo wada-shaqeynta amniga, laguna horumarinayo dadaallada wadajirka ah ee lagu xaqiijinayo amni waara, xasillooni, iyo dowladnimo xoogganoo dalka oo dhan ka hanaqaadda.



## Wasaaradda Amniga Gudahaoo Dardargelinaysa Dib-u-habeynta Hay'adeed iyo Horumarinta Waxqabadka

**Muqdisho, Soomaaliya – 9 Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha - XFS, Mudane Maxamed Shire, ayaa shir-guddoomiyey kulanka joogtadaah ee Agaasimayaasha Waaxyaha iyo La-taliyeyaasha Wasaaradda, kaas oo diiradda lagu saaray dardargelinta dib-u-habeynta hay'adeed, kor u qaadista hufnaanta shaqooyinka wasaaradda, iyo xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha hoos yimaada wasaaradda iyo bahwadaagta taageerta.

Kulanka ayaa lagu falanqeeyay horumarka laga gaaray hirgelinta qorshayaasha istaraatiijiga ah ee wasaaradda, dib-u-habeynta qaab-dhismeedka waaxyahasi ay ula jaanqaadaan nidaamka cusub ee dhawaan kasoo baxay Xafiiska Ra'iisal Wasaraha, horumarinta nidaamyada maamulka iyo maaliyadda, kobcinta awoodda shaqaalaha, iyo xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha hoos yimaadawasaaradda si loo xaqiijiyo adeegyo amni oo hufan, waxtar leh, isla markaana ka jawaaba baahiyaha dalka.

Agaasimayaasha Waaxyaha ayaa soo bandhigay warbixinno ku saabsan waxqabadkii la gaaray muddadii la soo dhaafay, caqabadaha jira, iyo qorshayaasha mudnaanta leh ee la fulin doono bilaha soo socda. Kulanka ayaa sidoo kale lagu lafaguray hababka lagu xoojin karo isku-duwidda howlaha waaxyaha kala duwan si loo dedejiyohirgelinta qorshayaasha iyo himilooyinka wasaaradda.

Mudane Maxamed Shire ayaa ku bogaadiyey Agaasimayaasha dadaallada ay muujiyeen, isagooku adkeeyay muhiimadda isla xisaabtanka, wada-shaqeynta, iyo dardargelinta fulinta qorshayaasha dib-u-habeynta iyo casriyeynta wasaaradda.

"Xoojinta awoodda hay'adeed, hufnaanta maamulka, iyo horumarinta shaqaalaha waa aas-aaska lagu xaqiijin karo adeegyo amni oo tayo leh iyo hay'ado dowladeed oo si wax ku ool ah ugu adeega shacabkaSoomaaliyeed," ayuu yiri Agaasimaha Guud.



## Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya oo la kulmay Safiirka Dowladda Shiinaha

**Muqdisho, Soomaaliya – 8 Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa kulan la yeeshay Safiirka Dowladda Shiinaha ee Soomaaliya, Wang Yu, iyagoo ka wada hadlay xoojinta xiriirka iskaashi ee u dhexeeya labada dal.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray arrimaha amniga, horumarinta awoodda hay'adaha amniga, iyo taageerada farsamo ee lagu xoojinayo dadaallada Dowladda Federaalka Soomaaliya ee lagu sugayo amnigaiyo xasilloonida dalka.Labada dhinac ayaa isla qaatay muhiimadda ay leedahay iskaashi dhow oo ku saleysan danaha wadajirka ah iyo taageerada joogtada ah ee saaxiibbada caalamiga ah.

Sidoo kale, waxaa laga wada hadlay taageerada tababarrada iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha Wasaaradda Amniga Gudaha, xoojinta awoodda hay'adaha amniga, iyo kor u qaadista iskaashiga la xiriira ka hortagga khataraha amniga iyo la tacaalidda walxahaqarxa iyo miinooyinka oo halis ku ah badqabka shacabka Soomaaliyeed.

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-afgarad ku saabsan sii xoojinta wada-shaqeynta Soomaaliya iyo Shiinaha, iyada oo labada dhinac ay muujiyeen sida ay uga go'an tahay horumarinta iskaashiga dhinacyada amniga, dhismaha awoodaha hay'adaha dowladda, iyo taageeridda dadaallada lagu xaqiijinayo amni waara iyo xasillooni dalkaka hanaqaadda.

## Wasiiru DowlahaWasaaradda Amniga GudahaDowladda Federaalka Soomaaliya oo ka qeybgalay kulankii koowaad ee Guddiga Qabanqaabada Tadobaadka Xorriyadda



**Muqdisho, Soomaaliya 08-June-2026:** Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Cali Xagaa, ayaa ka qeybgalay kulankiikoowaad ee GuddigaQabanqaabada Maalmaha Xorriyadda iyo Midnimada Qarankaee sanadguurada 66-aadee 26-ka Juun iyo 1-da Luulyo, kaas oo lagu qabtay magaalada Muqdisho.

Kulanka waxaa guddoominayay Guddoomiyaha Guddiga Qabanqaabada MaalmahaXorriyadda iyo Midnimada Qaranka ahna WasiirkaWasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS, Xildhibaan Cali Yuusuf Cali (Xoosh). Intiiuu socday kulankaayaa lagu gorfeeyay jadwalka shaqo ee guddiga, muhiimadda maalmahan qaran, weyneyntooda, iyo sidii si heer sare ah looga xusi lahaa gudaha dalka iyo dibaddiisaba, iyadoo sidoo kale diiraddala saaray dardargelinta howlaha qabanqaabada munaasabadaha ay ka qeyb qaadanayaan hay'adaha kala duwan ee dowladda.

Kulanka ayaa waxaa ka qeybgalay xubnaha Guddiga Golaha Wasiirrada Federaalka, Guddoomiyaha Gobolka Banaadir iyo mas'uuliyiin kale oo dowladda ka tirsan, kuwaas oo ka wada hadlay xoojinta wada-shaqeynta iyo isku-dubaridka howlaha lagu xaqiijinayo qabsoomidda munaasabadaha xuska Maalmaha Xorriyadda iyo Midnimada Qaranka si habsami leh oo u qalma qiimaha taariikhiga ah ee maalmahan ay u leeyihiin shacabka Soomaaliyeed.




## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha oo ka qeybgalay kulan heer sare ah oo lagu falanqeeyay qorshaha wada-shaqeyneed ee u dhexeeyaXafiiska Amniga Qaranka (ONS) iyo Hay'addaQaramada Midoobay ee La-dagaallanka Miinooyinka (UNMAS)

**Muqdisho, Soomaaliya – 7 Juun 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Shire, ayaa ka qeybgalay kulan heer sare ah oo lagu falanqeeyay qorshaha wada-shaqeyneed ee u dhexeeya Xafiiska Amniga Qaranka(ONS) iyo Hay'addaQaramada Midoobay ee La-dagaallanka Miinooyinka (UNMAS).

Kulanka waxaa sidoo kale ka qeyb galay Agaasimaha Guud ee Xafiiska Amniga Qaranka Mudane Cabdimaalik, iyo Madaxa UNMAS, Marwo Fran O'Grady, iyadoo diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga dowladda iyo saaxiibada caalamiga ah ee dhinacyada la xiriira miinooyinka iyo walxaha qarxa.

Qorshahan wada-shaqeyneed ayaa ah madal ay hoggaaminayso Dowladda Federaalka Soomaaliya, taas oo fududeysa isku-duwidda hay'adaha dowladda si loo hirgeliyo hannaan mideysan oo lagu xoojinayo dadaallada ka hortagga miinooyinka iyo yaraynta khataraha ka dhasha walxaha qarxa.

Intii uu socday kulanka, waxaa si gaar ah diiradda loo saaray hirgelinta Istaraatiijiyadda Qaranka ee Ka Hortagga Miinooyinka iyo Walxaha Qarxa, horumarinta qorshayaasha MaareyntaHubka iyo Rasaasta,iyo xoojinta awoodahahay'adaha amniga ee dalka.

Sidookale, waxaa lagu falanqeeyay horumarka ay sameeyeen CiidankaXoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, kuwaas oo si isa soo taraysa ula wareegaya masuuliyadda howlaha la xiriira baarista, ka hortagga iyo burburinta walxaha qarxa, iyo sidoo kale maareynta hubka iyo rasaasta.

Kulanka ayaa lagu bogaadiyay doorka muhiimka ah ee Hay'adda Maareynta Walxaha Qarxa ee Soomaaliya (SEMA) ay ka qaadato isku-duwidda howlaha bani'aadannimo ee miino-baarista, si loo xaqiijiyo badbaadada bulshada loona taageero shacabka ay saameeyeen miinooyinka iyo walxaha qarxa.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay wada-shaqeynta dhow ee hay'adaha dowladda, ciidamada amniga iyo saaxiibbada caalamiga ah si loo xoojiyo amnigadalka, loo yareeyokhataraha amni ee ka dhasha walxaha qarxa, loona ilaaliyo badqabka shacabka Soomaaliyeed.

## Wasiirka Amniga Gudaha oo guddoomiyay munaasabad lagu maamuusayay saraakiil Soomaaliyeed oo dhammaystay tababbar heer sare ah



**Muqdisho, Soomaaliya 03-June-2026:** Wasiirka Amniga Gudaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Jeneraal Cabdullahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) ayaa guddoomiyay munaasabad lagu maamuusay saraakiil Soomaaliyeed oo dhammaystay tababbarheer sare ah oo la xiriira ilaalinta amniga madaxdaqaranka, kaas oo ay ku soo qaateen dalka Serbia.

Munaasabadda oo ka dhacday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa lagu guddoonsiiyay saraakiisha shahaadooyin muujinaya guusha ay ka gaareen tababbarka.


Saraakiishan ayaa si gaar ah u bartayfarsamooyinka casriga ah ee ilaalinta madaxda qaranka,qiimeynta khataraha amniga,iyo xoojinta badqabka masuuliyiinta sare ee dowladda.

Kulanka ayaa waxaa ka qeybgalay xubnaha Guddiga Golaha Wasiirrada Federaalka, Guddoomiyaha Gobolka Banaadir iyo mas'uuliyiin kale oo dowladda ka tirsan, kuwaas oo ka wada hadlay xoojinta wada-shaqeynta iyo isku-dubaridka howlaha lagu xaqiijinayo qabsoomidda munaasabadaha xuska MaalmahaXorriyadda iyo Midnimada QaWasiir Cabdullaahi SheekhIsmaaciil ayaa ku bogaadiyay saraakiisha dadaalka iyo aqoonta ay soo kororsadeen, isagoo xusay in tababarradan ay muhiim u yihiin horumarinta awoodda hay'adaha amnigadalka iyo sare u qaadidda xirfadaha ciidamada u xilsaaran ilaalinta madaxda qaranka.

Wasiirka ayaa sidoo kale carrabka ku adkeeyay in Soomaaliya ay wajahdo caqabadoamni oo kala duwan, taasooka dhigaysa mid muhiim ah in la helosaraakiil leh aqooniyo tababar casriah oo awood u leh ka hortaggaiyo la tacaalidda khataraha amni ee lagu beegsan karo madaxda qaranka iyo xarumaha dowladda.

Tababbarkan ayaa qayb ka ah dadaallada joogtada ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ku xoojinayso tayada, xirfadda iyo diyaargarowga ciidamada amniga si ay si hufan uga jawaabaan khatarahaamniga qaranka, una xaqiijiyaan badqabkamadaxda iyo hay'adahadowladeed ranka si habsami leh oo u qalma qiimaha taariikhiga ah ee maalmahan ay u leeyihiin shacabka Soomaaliyeed.

## Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha oo la kulmay Madaxa Howlgalka EUCAP Soomaaliya



**Muqdisho, Soomaaliya – 2 Juun 2026:** Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Jeneral Cabdullahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) ayaa kulan la yeeshay wafdi ka socday EUCAP Somalia oo uu hoggaaminayay Madaxa Howlgalka EUCAP Soomaaliya, Kestutis Lancinskas. Kulanka waxaa sidookale ka qeyb galay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, MudaneMaxamed Shire, iyo qaar ka mid ah Agaasimayaasha Waaxyaha Wasaaradda.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga amniga, taageerada farsamo iyo tababarrada ay EUCAP siiso hay'adaha amniga Soomaaliya, gaar ahaan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Ciidanka Daraawiishta iyo Ilaalada Xeebaha. Sidoo kale, waxaa laga wada hadlay dib-u-eegista istaraatiijiyadda EUCAP iyo sidii taageerada amniga loo waafajinlahaa mudnaanta DowladdaFederaalka Soomaaliya.

Wasiirka Amniga Gudaha iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ayaa adkeeyay muhiimadda isku-duwidda iyo lahaanshaha dowladda ee dhammaan dadaallada lagu taageerayo hay'adahaamniga dalka. Dhankiisa, Madaxa Howlgalka EUCAP ayaa xaqiijiyay sida ay uga go'an tahay sii wadista taageerada Midowga Yurub ee Soomaaliya.

Labada dhinac ayaa ku heshiiyay in la qabto kulan farsamo oo lagu hirgelinayo dib-u-eegista istaraatiijiyadda EUCAP, xoojinta iskaashiga amniga iyo taageerada hay'adaha amniga Soomaaliya.

info@mois.gov.so
www.mois.gov.so

Via Tanzania 888 Building,
Mogadishu, Somalia

MoisJFS

mois_fgs